Dagaalada ka dhex dhaca ee la xiriira arrimaha qoyska nooc kasta oo uu yahayba, kiisa ah muuqaalka jirka, galmada, niyada ama dhaqaalaha taas oo ay isku xadgubaan dad cilaaqaad ka dhaxeeyo. Cidna dusha kama saari kartid, dabeecadaada xad gudubka leh waa mid aan loo dul qaadan Karin. Kaalmo ayaadna heli kartaa.

Wixii cabasho ah ee aad heysid Waxaa soo dhaweynaya. Maxkamada takhasuska ku ah dagaalada la xiriira arrimaha qoyska ka dhex dhaca waa wax cusub oo nagu soo biirey

Waanan soo dhaweyneynaa wixii cabasho ah ama wax laga leeyahay, waxa ay West London Megistate Court (maxkamada hoose ee garnaqa) ku weydiineysaa in aad buuxiso foom si ay uga caawiso maxkamada iyo heyadaha Samafalka in ay dhibaatadaada ogyihiin.

Hayada ku kaalmeysaa aad ayey ugu faraxsan tahay in ay u gudbiso maxkamada wixii fikrado ah ee aad heyso si ay uga caawiso habkii ay ku horumarin lahaayeen adeegyadooda.

Numbarada aad la xidhiidhi lahayd ama Hayadaha wax kaalmeeya

Waa hubaal in ay qarsoodi yihiin arrimahooda adeegyada oo dhami.

Adeegyada Markhaatiyaasha: 020 8700 9342 ama 020 8700 9448

Haddii aad degen tahay xaafadda Hammersmith iyo Fulham:

(Adeegyada caawina wax qabadka oo ah kuwo horumarey): 020 7385 0409

Booliska qeybtiisa badbaada bulshada: 020 8246 2880

Haddii aad degan tahay xaafada Kensington iyo Chelsea:

Caawimada dumarka ee Eaves : 020 7373 8660

Dhibanaha meesha lagu taakuleeyo: 020 7259 2424

Booliska qeybtiisa badbaadada bulshada: 020 8246 0226

Wixii arrin degdeg ah oo ku saabsan aflagaado iyo daandaansiba wac: 999

Maxkamada Khaaska ah ee Arrimaha Dagaalka ka dhex dhaca Qoyska

Ee West London Magistrates Court

Warbixinta Dhibanaha/Markhaatiga

West London Magistrates Court

181 Talgarth Road London W6 8DN

Version 1.1 March 2003 – Translated by CITAS

Maxkamada khaaska u ah dagaalada ka dhex dhaca qoyska dhexdiisa ee West London Magistrates Court

Laga soo bilaabo Oktoobar 2002 iyo wixii ka horeeyey, dagaalada dhex mara qoysaska ee la keeno maxkamada waxa loola dhaqmi jiray habab kala gedisan taas oo ay ula dhaqanto Maxkamada West London Magistrates Court.

- Hab cusub oo khaas u ah dagaalada dhex mara qoysaska dhexdiisa ayaa maxkamadu ay ula dhaqmi doontaa qadiyadaha intooda badan.
- Qof kasta oo arrinkaa wax ka qabanayaa waxa ay maxkamadu siineysaa tababar ah dagaalada ka dhex dhaca qoysaska dhaxdiisa taa micnaheeduna waa dhibane/markhaati.
- Xoog aad u balaadhan ayaa la galinayaa badbaadada marka aad imanayso maxkamada iyada oo lagu caawinayo.
- Qoraalkan warbixineed waxa uu kaa caawinayaa oo uu kuu sheegayaa sidii aad u isticmaali

lahayd iyo wixii aad heli lahayd ka hor, ka dib iyo waqtiga maxkamada lagu jiro.

Ka hor inta aan maxkamada la iman

Waxa aad la xidhiidheysaa hayadaha ku qoran xagga danbe ee boggan, waqti kasta oo ka horeeya ama ka danbeeya inta qadiyadaadu tahay qof dhibane ah dagaalada dhex mara qoyska dhexdiisa. Waxa ay kugu caawinayaan warbixin, talobixin iyo waxyaalihii kale ee u baahan ficil qabasho ee

la xidhiidha badbaadadaada. Hadaad go'aansato in aad hadda la xidhiidho iyo haddii kaleba, waxa halkan ku yaal aragtiyo kuu diyaarinaya sidii aad isu badbaadin lahayd oo aad naftaada ugu diyaarin lahayd maxkamada.

La hadalka adeegyada markhaatiyaasha…

...**Si laguugu diyaariyo in aad soo booqato maxkamada**(ka hor inta aan maxkamadu dhicin soo booqashadeeda) ka hor taariikhda maxkamadu dhaceyso waa in aad ogaataa waxa dhacaya, meesha, oo aad eegtaa ama aad ka codsataa badbaadada maalinta maxkaamdu dhaceyso, tusaale waxa aad codsan kartaa in aad maxkamada ka codsato in aad ka baxdo meel kale oo gaar ah oo aad ka soo gasho hadaad ka walwalsan tahay in aad la kulanto qofka aad wada joogteen/ama aad wada joogi jirteen;

... haddii aad tahay qof lixaad la'a oo aad u baahan tahay in meel aad baaburka dhigto maxkamadu

kuu sii diyaariso, ama ay kuu fidiso caawimo sidii aad u soo geli lahayd dhismaha.

La hadashid Booliska…

...Haddii aad u baahan tahay turjumaan ama turjumaan luuqada dadka dhagaha la'a ee yaqaan calaamada Ingiriisiga in uu joogo maxkamada in uu ku caawiyo marka aad

maxkamada imaneysid inta aanu dhicin keyskaagu ama uu kaa caawiyo maxkamada markhaati ahaan;

...**Ama hore laguugu sii diyaariyo wixii aad ku soo socdaali lahayd** (kharashka oo foojar ah) si ay u daboosho kharashka aad ku imaneysid maxkamada. Haddii aanad amaan ku dareemeynin gaadiidka dadweynaha, u sheeg booliska – waxa ay kuu diyaarinayaan hab kale oo aad ku timaadid maxkamada;

... **wixii kale ee ku saabsan talaabo sharci ah** ee la xidhiidha dagaalka ka dhex dhaca qoyska dhexdiisa, tusaale amarka Laga bixinayo wixii aan ahayn faraxumeyn, ama aan ahayn habka uu

ilmaha qofku ku soo booqan lahaa.

...mar uun haddey hanjabaadi jirtey ama wixii ku saabsan, cabsi ama wax khatar ah laguu geysanayo, ama la jabiyo waqtiga la yidhi ku soo noqo ama laga mamnuuco in uu meesha agagarkeeda yimaado oo uu jabiyo qeynuunkeeda qofka kula deganaa/ama kula noolaan jirey

Kharashka maalintaa

Waad soo dalacan kartaa kharashka iyo waxa aad ku soo socdaashey iyo wixii guno ah ee aad qaadan lahayd maalintaa ee kaa baaqdey ama aad weydey. Xafid rasiidada oo dhan Waa in aad ka heshaa foom laguugu soo dirayo boostada oo ay kuu soo dirayaan boolisku, haddeyna dhicin, fadlan u sheeg qareenka ku muduciga ah eedeysanaha.

Maalinta aad tagto maxkamada

- Waxa ku soo raaci kara saaxiib oo kula sugi kara.
- Soo qaado lacag aad ku iibsato cunto iyo cabitaan.
- Isku dey in aad timaado waqti lagu rabo in yar ka hor.
- Marka aad timaado, u sheeg qofka jooga risibshanka in aad tahay qof goob joog ahaa dhibaato oo u socda maxkamada gaarka ah ee qoyska ay dhexmaraan dagaaladu.
- Waxa aad la kulmeysa qof u shaqeeya Adeega dadka goob jooga u ahaa dhibaatada(ee degan xaafadda Kensington iyo Chelsea) ama hordhac ahaan (deganayaasha xaafadda Hammersmith iyo Fulham), kaas oo kuu sharxi doona waxa dhici doonaa, oo kula joogaya.
- Qofka la soo eedeeyey waa laga saarayaa qolka wax lagu sii sugo.
- Haddii aad dalbatey turjumaan, waa lagu baraya iyaga.

Maxkaxada dhexdeeda

Marka aad gasho qolka maxkamada, qofka ku caawinaya ee ka socda adeega dadka goob jooga u ahaa dhibaato ama horumariyaha ah ayaa isna joogaya meesha. Waxa lagu tusayaa meesha qofka markhaatiga ahi is taago waxaana lagu weydiinaya su'aalo oo uu ku weydiinayaa qareenka muduciga ku ah eedeysanaha iyo qareenka u doodaya

eedeysanaha. Marka aad sheegato wixii cadeymo ah, waxa laguu sheegayaa in aad ka tagto maxkamada.

Magistrates (maxkamada hoose ee garnaqa) ayaa dhageysaneysa cadeymaha oo dhan (tusaale, wixii ka yimid booliska, markhaati, cadeyn caafimaad) markaa la goaansho' in

lagu soo oogo qofka in uu dagaalka uu kula galey yahay mid uu danbiile ku yahay ama aanu ku ahayn. Hadii maxkamada hoose ee garnaqa ay goaansato in qofku uu danbiile waxa ay go'aan ku gaadheysaa (ciqaabtiisa) waana lagula soo socodsiin doonaa. Yahay

Maxkamada ka dib

Waxa kula soo xidhiidhaya booliska/ama qofka ka tirsan hayada ku Caawisay kulana socodsiinaya wixii ay maxkamadu go'aan ku gaartay

Waxaa kale oo ay ku soo siinayaan wixii warbixin ah oo ku saabsan wax alla wixii suurogal ah oo ay hayadaha waxa caawiya ay kaa caawin karaan.

Hayada ku caawineysa Waxay kaa caawini kartaa in ay kuu dalabto qaanuunkii ku amri lahaa badbaadadaada (oo ayna ku jirin amarka aan ahayn faraxumeynta) haddii aanad lahayn mid.

Haddii lagu cabsiiyey ama lagu daandansadey Si kastaba ha ahaatee oo uu kugu sameeyey ama aad sameysay qof aad wada nooshihiin ama aad wada nooleydeen markii ay maxkamadu dhacdey, waa in aad markiiba la xidhiidhaa booliska ama aad la xidhiidhaa hayadii ku caawintay.

Somali June 2004